

## 24-saacadood oo ah cabbirista pH-da



Lovisenberg Diakonale Sykehus

Lovisenberg Diakonale Sykehus  
Medisinsk poliklinikk  
Lovisenberggt. 17  
Telefon: 2322 5720

24 timers pH måling 11.2019 somali



Lovisenberg Diakonale Sykehus

## **24-SAACADOOD oo ah CABBIRISTA pH-da EE HEERKA AASHITADA KU JIRTA DHEEF-MAREENKA**

### **Ujeeddo**

Ujeeddada cabbirista 24-saacadood ee pH-da waa in la cabbiro heerarka aashitada ee ku jirta dheef-mareenka.

### **Diyaagarood**

Dawooyinka dejiya aasidhka (dejiya barootoonnada aashitada cusbaysan) sida Omeprazol, Esomeprazol (Losec/Nexium), Pantoprazol (Somac) ama Lanzoprazol (Lanzo),

**waa inaad joojisaa isticmaalkooda 7 maalmood kahor baarista.**

Dawooyinka kale ee asiidhka yareeya, laguna magacaabo ka- hortagayaasha H2-da sida Tagamet, Pepcid iyo Zantac,

**waa inaad joojisaa isticmaalkooda 2 maalmood kahor baarista.**

Dawooyinka baabi'iyaa aashitada sida Link, Novaluzid iyo Gaviscon,

**waa inaad joojisaa isticmaalkooda habeenka ka horreeya baarista.**

***Waa inaad soontid 6 saacadood kahor baarista, yacni waxba ha cunin. Laakiin waad cabbi kartaa hal bakeeri oo biyo ah ilaa 2 saacadood kahor baarista haddii aad oomman tahay.***

### **Baarista laftigeeda**

Tuubbo dhuuban (2 mm) ayaa la geliyaa mid kamida labada dalool ee sanko oo lasii dhex mariyaa dheef-mareenka ilaa la gaaro caloosha, si loo ogaado meelaha aashitada leh. Tuubbada waxaa lagu xiraa qalab si joogtaa u cabbiraya heerka pH-da maalin iyo habeenkeeda. Waa inaad xiratid suun lagu dul dhejinayo qalabkaas. Wixii kasoo baxa cabbirista waxaa duubaya qalabkaas cabbiraha ah.

*Waa muhiim inaad u **noolaatid si caadi ah maalintaas iyo habeenkaas** baaristu socoto sida waqtiyada cuntada, waxqabadka iyo shaqada. Qaabkaas ayaa cabbirradu sawir sax ah uga bixin karaan xaaladdaada caadiga kuu ah markaad qabanaysid hawl-maalmeedkaaga joogtada ah.*

### **Gabagabada baarista**

Markay kasoo wareegto maalin iyo habeen, ayaad kusoo noqonaysaa shaybaarka cudurrada caloosha adigoo sita qalabkii cabbiraha ahaa, waxaana lagaa soo saarayaa tuubbadii.

### **Dhibaatooyin**

Aad bay u yar tahay in baaristani ay keento wax dhibaato ah.

### **Baarista kadib**

Ma jirto wax gooni ah oo ay lagama maarmaan tahay in tixgelin gaara la siiyo baarista kadib, waxaadna sidoodii u qaadan kartaa dawooyinkii gaaska/aashitada ee aad qaadan jirtay.

### **Natiijada baarista**

Dhakhtarkii kusoo diray ayaa loo sheegayaa natiijada baarista.

Mararka qaarkood waxaa ballan kuu qabanaya dhakhtar halkaan ka shaqeeya si xaalkaaga loola socdo.

Haddii loo baahdo, waa lagu siinayaa caddayn qoraala inaad timid baaristaan.

Dhakhtarka isbitaalku ma qorayo warqad jirro.